

مسارات
خيرية CHARITABLE
PATHS

Tirsiga (31) Mar 2024

مجمع
الرحمة
العالمية
Ciid wanagsan



MASHAARIICDA SAMAFALKA RAMADAANTA

bixinta sadaqada iyo xoojinta qiyamka wax bixinta





03



MASHAARIICDA
BIYAHA IYO
FAYADHOWRKA



04



ADEEGYADA IYO
HAWLAHA SAMAFAL
EE CAAFIMAADKA



05



MASHAARIICDA
DHISMAHA



09



MASHAARIICDA
XOOGSI XALAAL AH



10



MASHAARIICDA



Address: Barbera Road - Hargeisa
Mobile: +252633278256
Phone: +252514333
E-Mail:
Website: www.arcsom.org

مسارات
خيرية CHARITABLE
PATHS

WAA DHANBAAL BILLE AH OO
HAYADDA GARGAARKA AFRICA
(A.R.C) AY KAGA WARRANTO
MASHAARIICDEEDA HORUMARINEED
IYO BANI-AADAMNIMO .

TIRSIGA (31) MARCH 2024



MASHAARIICDA BIYAHA IYO FAYADHOWRKA



CEEL CUSUB OO LAGA HIRGELIYEY DEEGAANKA DACARBUDHUQ

ARC ayaa xadhiga ka jartay ceelbiyood jooggiisu dhan yahay 15 mitir oo ay ka hirgelisay degmada Dacar-budhug ee gobalka Saaxil Somaliland. Ceelkan oo awoodaya in uu daboolo baahida biyaha nadiifta ah ee 50 qoys, waxaa maalgelisay hay'adda caalamiga ah ee ALRAXMA ee dalka Kuweyt.

Mashruuca hirgelinta ceelkani waxa ay qayb ka tahay Barnaamijka biyaha iyo fayadhowrka ee ay hay'adda Gargaarka Afrika ka fuliso dhulka Soomaalida ee

gobalka Geeska Afrika. Boqollaal qoys ayaana sannad kasta ka faa'idaysta barnaamijkan oo ujeeddadiisu tahay, in qoysaska saboolka ah ee ku nool dhulka baadiyaha ah laga caawiyo helitaanka iyo gaadhitaanka biyaha nadiifta ah. Gaar ahaan deegaannada oomanaha ah, kuwaas oo dadka ku dhaqani ay xilliyada abaaraha la kulmaan rafaad badan oo dhinaca biyo helista ah, iyo marar badan xaalado caafimaad darro oo ka dhasha biyaha aan nadiifta ahayn ee ay helaan.



ADEEGYADA IYO HAWLAHA SAMAFAL EE CAAFIMAADKA



ARC OO HARGEYSA KA FULISAY QALLIINKA XIDHISTA FARUURTA OO BILAASH AH



Hay'adda Gargaarka Afrika ayaa ku guulaysatay fulinta Mashruuc faruurta loogu xidhay carruura kala duwan oo ay ka fulisay magaalada Hargeysa, iyada oo adeegsanaysa dhakhaatiirta takhasuska ah ee cisbitaalka caalamiga ah ee Hargeysa.

Mashruucan oo baadhitaannada, qalliinka iyo dawaduba ay bilaash ahaayeen, waxaa ka faa'idaystay saddex carruura ah. Waxa aanu qayb ka yahay ololayaal caafimaad oo ay hay'adda gargaarka Afrika

sannad kasta uga faa'idayso boqollaal bukaan Soomaaliyeed ah oo ku dhaqan deegaannada kala duwan ee Soomaalida gobalka Geeska Afrika.

Caafimaadku waxa uu ka mid yahay Barnaamijyada waaweyn ee ay ARC ka fuliso Somaliland, waxaana ka mid ah cisbitaallo uu ku jiro cisbitaalka caalamiga ah ee Hargeysa, iyo adeegyo kala duwan oo samafal, kuwaas oo ay gacan ka geysato hay'adda caalamiga ah ee ALRAXMA Kuweyt.



MASHAARIICDA DHISMAHA



HAWSHA DHAMMAYSTIRKA XARUNTA AMAL EE BOORAMA OO MEEL FIICAN Maraysa



Waxaa weli si firfircoon u socota hawsha dhammaystirka dhismaha, xarunta caafimaadka ee AMAL oo ka socda Boorama. Waa Mashruuc ay dedejintiisu muhiim tahay, marka la eego baahida daran ee bulshadu ay u qabto adeegyo caafimaad oo casri ah.

Magaalada Boorama ee xarunta gobalka Awdal, waxa ay ka mid tahay deegaannada ay ARC muddada dheer ka wadday, adeegyada caafimaad iyo mashaariic kale oo waxbarasho iyo guud ahaan arrimaha



samafalka la xidhiidha.

Mashruucan waxaa caawinaysa hay'adda caalamiga ah ee ALRAXMA Kuweyt, waxa aanu qayb ka yahay barnaamijka samafalka caafimaadka ee ARC oo ka socda deegaanno kala duwan oo Geeska Afrika ah.

ARC waxa ay hore xarumo caafimaad iyo cisbitaallo uga dhistay, kana shaqaysiisaa deegaanno kala duwan oo ka mid ah dhulka Soomaalida ee gobalka Geeska Afrika.





ARC oo Masaajid cusub ka hirgelisay magaalada Hargeysa

Waxaa xadhigga laga jaray Masaajid cusub oo halkii mar ay ku tukaan karaan 116 qof, masaajidkan oo laga dhisay xaafadda Xeedho ee magaalada Hargeysa, waxa uu ku fadiyaa dhulk cabbirkiisu dhan yahay 70 mitir oo isku wareeg ah. Waxaana loo dhammaystiray kaabayaasha muhiimka u ah oo ay ka mid yihiin goosha, kutubta, iyo goobta

weydsada.

Hay'adda caalamiga ah ee ALRAXMA ayaa maalgelisay dhismaha masaajidka, waxa aanu qayb ka yahay Barnaamijyada dhismaha Masaajidda iyo xarumaha waxbarashada iyo dhaqanka oo ay ARC ka fuliso deegaanno kala duwan oo ka mid ah Geeska Afrika.





MASHAARIICDA SAMAFALKA RAMADAANTA

bixinta sadaqada iyo xoojinta qiyamka wax bixinta

Hay'adda Gargaarka Afrika (ARC) ayaa rashinno taakulo ah oo ay qoysaska saboolka ah ugu talagashay bisha soon, waxa ay gaadhsiisay 3,370 qoys oo ku dhaqan deegaanno kala duwan oo ka mid ah Somaliland iyo Soomaaliya.

Rashinkan oo isugu jiray bariis, sonkor, daqiiq, saliid iyo timir qoys kasta, ayaa la gaadhsiiyey 600 oo qoys oo Hargeysa ah, 310 qoys oo Muqdisho ah, 200 oo qoys oo Boorama ah, 150 qoys oo Garoowe ah, magaalooyinka Burco iyo Laascaanood oo middiiba 50 qoys ay tahay, iyo 2010 oo

goobo kala duwan iyo xarumo waxbarasho lagu qaybiyey.

ARC ayaa sannad kasta kumannaan qoys oo sabool ah gaadhsiisa rashinno ay ugu talagashay bisha soon, waxa aanu qayb ka yahay Barnaamijka gargaarka bani'aadamnimo ee hay'addu ay ka fuliso gobalka Geeska Afrika.

ARC waxaa barnaamijkan ka gacansiiya samafalayaal u dhashay dalka Kuweyt oo soo mariya hay'adda Caalamgia ah ee ALRAXMA.



مشروع الكسوة العيدية

عيد الفطر

إشراف/ جمعية الرحمة العالمية
دولة الكويت

تنفيذ/ لجنة أفريقيا للإغاثة
أرض الصومال

2024 هـ - 1445 م



Hay'adda iyadoo kaashanaysa hay'adaha ay wada shaqaynta leeyihiin ayaa 200 oo carruur ah oo ku nool magaalada Hargeysa ay ugu deeqday dhar cusub munaasibadda Ciidul Fidriga awgeed. Qorshahan ayaa ku soo beegmaya xilli ay Hay'addu dadaal ugu jirto sidii ay farxad iyo rayn rayn ugu faafin lahayd dareenka carruurta, iyadoo dhar cusub loo qeybiyay qoysaska danyarta ah si ay carruurta ugu suurtagasho in ay ku ciidaan jawi farxad iyo niyad-sami leh. Hawshan bani'aadantinimo waxay ka tarjumaysaa astaanta wada jirka iyo naxariista ee bulshada dhexdeeda, iyadoo Mu'asasada iyo la-hawlgalayaasheeda ay aad ugu dadaalaan sidii ay taageero iyo

Farxadda 200 oo carruur ah oo ku nool magaalada Hargeysa munaasibada Ciidul Fidriga awgeed

gargaarufidinlahaayeendadkaubaahan,iyo inayfarxad iyo raynrayn ku keenaan nolosha carruurta, gaar ahaan xilliyadan oo kale. Mu'asasada waxa ay mahadnaq iyo bogaadinkaliyolaabahusoojeedinaysaalahawlgalayaasheeda sharafta leh ee garabistaagay, iyaga oo caddeeyey dadaalkooda joogtada ah ee lagu caawinayo dadka baahan iyo faafinta farxadda xilliyadan oo kale Sidoo kale, Mu'asasada ayaa dhammaan Muslimiinta Caalamka ugu hambalyaynaysa maalinta Ciida kana dhigo mid kheyr iyo barako leh, iyadoo Alle uga baryaysa inuu adkeeyo xiriirka iyo isku xirnaanta bulshada dhexdeeda.



WAXBARASHADA



Barnaamij Noociisu Cusub Yahay: Arday 25 Maalmood Loo Xareeyey Qur'aan Xafidis



116 arday oo laga keenay goballada Somaliland iyo dawlad-deegaanka Soomaalida, ayaa dhammaystay kooras xiftiga Qur'aanka iyo barbaarinta toosan ee Islaamka ah oo ay 25 maalmood ugu xaraysnaayeen xarunta Kuweytiga ee magaalada Hargeysa. Barnaamijkan oo ramadaanta loogu talagalay, waxaa ardaydan fursad loo siiyey in ay waqti buuxa oo firaqo ah u helaan xafidista Qur'aanka iyo casharro la xidhiidha akhlaaqda islaamka, horumarinta nafta, Wacdi iyo waano diiniya oo culimada dalka ugu waaweyn loo keenay, maaweelo, Jimicsi jidheed, iyo ku tababarista iyo ku dhiirrinta fagaare ka hadalka iyo in bulshada wax loo sheego.

Ardaydan oo muddadaas ay hoygooda iyo noloshoodaba si buuxda u damaanad qaadday xarunta Kuweytigu, 30 ka mid ah waxaa loo dhammaystiray xafidista Qur'aanka oo ay hore u soo wadeen, halka 42 arday la xafidsiiyey illaa toban jus, inta soo hadhayna ay xafideen inta u dhexeysa laba illaa shan jus.

Waxa uu ahaa barnaamij noociisa markii ugu horreysay Somaliland lagu qabtay, waxa aanay u jeedadiisu ahayd in carruurta la siiyo waqti ay u khalaaweeyaan xiftiga Qur'aanka iyo Barashada diinta islaamka. Sida oo kale waxa ay u ahayd fursad dal-barasho, isdhexgal

bulsho, iyo in ilmaha lagu abuurto kalsooni ah in uu isku filnaan karo, iyada oo aanu ka baydhayn jidka toosan ee islaamka iyo anshax wanaagsan ee uu guriga iyo dugsigaba ku bartay.

Munaasabad lagu soo xidhayey barnaamijkan oo lagu qabtay xarunta Kuweytiga, ayaa waxaa ka soo qaybgalay wasiirka waxbarashada iyo Sayniska mudane Dr. Axmed Aadan Buuxane, iyo wasiirka Awqafta iyo arrimaha diinta Sheekh Maxamed Xaaji Aadan Cilmi, guddoomiyaha bangiga dhexe ee Somaliland, Eng. Cali Cabdilaahi Daahir, Sheekh Almis Xaaji Yaxye Ibraahim, Sheekh Cabdiraxmaan Khadiib, iyo masuuliyiin iyo marti sharaf kale oo kala duwan.

Xarunta Kuweytigu waxa ay ka mid tahay mashaariicda waxbarashada ee hay'adda gargaarka Afrika, waxaana maalgelisyay hay'adda Caalamiga ah ee ALRAXMA Kuweyt. Waxaana munaasabadda Khadka maqal iyo muuqaalka ah ee Internet ka kaga soo qaybgalay madaxa Waaxda Afrika ee hay'adda ALRAXMA oo ku sugan dalka Kuweyt.

Masuuliyiinta munaasabadda ka hadlay ayaa dhammaantood iska dabamaray Bogaadinta barnaamijkan dalka ku cusub, iyaga oo codsaday in uu sii socda sannada dambana. Waxa aanay hambalyo iyo ereyo dardaaran ah u jeediyeen ardayda ka faa'idaysatay. Waxa aanay ardayda ku dhiirrigeliyeen in ay sii wadaan xiftiga Qur'aanka Kariimka ah iyo Barashada Islaamka, iyaga oo dhinaca kalana u mahadnaqay hay'adda Gargaarka Afrika (ARC) ee barnaamijkan qabatay iyo sida oo kale hay'adda ALRAXMA Alcaalamiya oo iyadu maalgelisa mashaariicda ARC iyo guud ahaan dalka Kuweyt.



MASHAARIICDA ARRIMAHA BULSHADA



ARC Oo Xoolaysay Qoys Danyar Ah, Magaalada Baladweyne

Hay'adda Gargaarka Afrika (ARC) ayaa neef lo' ah oo lamaan ku wareejisay qoys ay xooluhu ka baxeen oo ku dhaqan duleedka magaalada Baladweyne ee gobalka Hiiraan.

Neefkan lo'da ah oo irmaan ayaa loogu talagalay dhaqaso, iyo in ay ka faa'idaystaan caanaheeda, subaggeeda

iyo taranteedaba. Waxa uu qayb ka yahay Barnaamijka Xoogsi xalaal ah oo ay ARC ka fuliso deegaannada Soomaalida ee gobalka Geeska Afrika, kaas oo ay ujeedaddisu tahay in dib Xoolo loogu sameeyo qoysaska baadiyaha ee ay xooluhu ka baxaan. Barnaamijka oo ka kooban qaybo kala duwan, waxaa maalgelisa hay'adda caalamiga ah ee ALRAXMA Kuweyt.





ARC Oo Meherado Ganacsi U Furtay Qoysas Danyar Ah



Mashruuca Xoogsi xalaal ah ayaa qoysas danyar ah u furay meherado ganacsi, si ay ugala soo baxaan nolol maalmeedkooda. Gaadhi-gacanno loogu talagalay miis lagu dul iibiyo cuntada iyo cuntadii saarnayd ee bilowga ganacsiga ayaa la guddoonsiiyey shan qoys oo ku dhaqan magaalada Hargeysa ee caasimadda Somaliland. Sida oo kale laba dukaan ayaa loo furay laba qays oo iyaguna ka mid ah, qoysaska danyarta ah ee ku dhaqan magaalada Hargeysa.

Barnaamijkan oo lagu wado in ay ka faa'idaystaan dad gaadhaya 49 ruux oo ku tiirsan qoysaskan, waxaa loogu talagalay in uu ka caawiyo helitaanka il dakhli, waa aanu qayb ka yahay Barnaamijka Xoogsi



xalaal ah oo ay ARC ka fuliso deegaannada Soomaalida ee gobalka Geeska Afrika.

Xoogsi Xalaal ah ujeedadiisu waa in la maalgeliyo hindiseyaasha dakhli soosaar ee muwaadiniinta danyarta ah, iyo in qoyska laga caawiyo in ay helaan il dakhli oo ay kaga maarmi karaan baahida joogtada ah ee caawimada dibadda. Waxa aanu waafaqsanyahay, Yoolka caalamiga ah ee qaramada midoobey ee helitaanka horumar waara (Sustainable development).

Barnaamijkan waxaa maalgeliya samafalayaal u dhashay dalka Kuweyt oo soo mariyaan hay'adda caalamiga ah ee ALRAXMA Kuweyt.



عيوننا

Ciid wanagsan



@africanreliefco



Allaah ha idinka aqbalo
acmaashiina

تَقَبَّلْهُمِنَّا يَا رَبِّهِمْ

Address: Barbera Road - Hargisa
Mobile: +252633278256
Phone: +252514333
E-Mail: somalia office1@gmail.com
Website: www.arcsom.org

